



TOOGTAHA FIRFIRCOON SIDA LOO JAWAABO



Nambarada Degdegga

ADEEGYADA DEGDEGGA: _____ 9 -1 -1 _____

XAAFADDA DEGDEGGA MACLUUMAADKA KHADKA: _____

WAAXDA BOLIISKA XAAFADDA: _____

WAAXDA DABKA XAAFADDA: _____

ISBITAALKA XAAFADDA: _____

LAANTA DIBADDHA XAAFADDA FBI: _____

AMMAANKA DHISMAHA: _____

CINWAANKA DHISMAHA: _____

DABAQA: _____ SUITE/QOLKA: _____

NAMBARKA XAFIISKA #: _____ KHADKA _____

SAWIRKA TOOGTAHA FIRFIRCOON

Toogtaha Firfircoon waa qof si firfircoon uga qeybgala dilka ama iskudaya in uu dad ku dilo meel kooban oo lagu badan yahay; inta badan kiisaska, toogteyaasha firfircoon waxay adeegsadaan hub (hubab) xabadda ka dhacdo mana jiro sasaan ama hab ay ku xushaan dhibaneyashooda.

Lama saadaalin karo xaaladaha toogtaha firfircoon, waxayna isu badbadalaan si degdeg ah. Caadi ahaan, waxaa loo baahan yahay in si degdeg ah goobta loo geeyo hirgelinta sharciga si loo joojiyo toogashada loona yareeyo waxyeelada soo gaara dhibaneyashooda.

Bacdamaa xaaladaha toogtaha firfircoon ku dhamaadaan muddo 10 ilaa 15 daqiqo, ka hor inta hirgelinta sharciga aysan imaanin goobta, dadka waa in ay maskax iyo jir ahaan diyaar yahiin si ay uga hortagaan xaaladda toogtaha firfircoon.

Hababka wanaagsan ee looga hortago xaaladda toogtaha firfircoon

- Ogow agagaarkaada iyo halista suurtogalka ah
- Xasuuso labada meel ugu dhaw ee laga baxo dhismo kasta aad soo booqatid
- Haddii aad ku sugaran tahay gudaha xafiis, joog meeshaada kaddibna xer albaabka
- Haddii aad ku sugaran tahay meelaha la maro, waxaad gashaa qol kaddibna soo xero albaabka
- Tallada ugu dambeysyo, iskuday in aad dhulka dhigtiid toogtaha firfircoon. Marka toogtaha kuu jiro masaafo dhaw, adigana aadan carari karin, fursadda in aad noolaatid waxay badan tahay haddii aad iskudaydid in aad xoog ku maquunisid isaga/iyada.

**WAC 911
MARKA AY AMAAN TAHAY IN
SIDAAS LA SAMEEYO!**

SIDA LOOGA JAWAABO MARKA TOOGLAHA FIRFIRCOON KU SUGAN YAHAY MEEL KUU DHAW

Dakhso u go'aanso habka ugu macquulsan aad ku badbaadisid naftaada. Xasuuso in ay u badan tahay in macaamiisha iyo dadka meesha ka adeegta in ay raacaan hoggaamiyaha shaqaalaha iyo maamuleyaasha marka lagu dhex jiro xaaladda toogtaha firfircoon.

1. OROD

Haddii uu jiro jid la mari karo laguna baxsan karo, iskuday in aad ka baxdid xerada. Hubso in aad:

- Maskaxda ku haaysid jid iyo qorshe aad ku baxsatid
- Baxsatid xattaa haddii dadka kale aysan raali ku noqonin in ay ku soo raacaan
- Gadaal ku dhaaf waxyaabaha aad leedahay
- Ku kaalmee kuwa kale in ay baxsadaan, haddii ay suurtogal tahay
- Ka ilaali dadka in aysan gelin meel laga yaabo in uu ku jiro toogtaha firfircoon
- Ha la arko gacmahaada
- Raac tilmaamaha saraakiisha boliiska
- Ha iskudayin in aad dhaqaajisid dadka dhaawacan
- Wac 911 marka aad nabad gashid

2. DHUUMO

Haddii aysan suurtogal ahayn in aad baxsatid, hel meel aad ku dhumaatid, uusan kaa arki karin toogtaha firfircoon.

Meesha aad ku dhuumatid waa in:

- Ay ahaato meel uusan kaa arki karin toogtaha firfircoon
- Aad ku badbaadi kartid haddii xabbado loo soo rido dhankaada (sida xafiis la soo xeri karo lana qufuli karo)
- Aysan kugu noqonin dabbin ama aysan kaa xayirin fursadda aad ku dhaqaaqdid

Si aad toogtaha firfircoon uga ilaalisid in uusan soo gelin goobta aad ku dhuumatay:

- Quful albaabka
- Alaab culus ku dadab albaabka

Haddii toogtaha firfircoon kuu dhaw yahay:

- Quful albaabka
- Aamusi telefoonkaada gacanta iyo/ama baajarka
- Dammi ilo kasta oo laga maqlo qeylo (sida raadiyaha, telefishanada)
- Ku dhuumo gadaasha alaabta waaweyn (sida armaajooyinka, miisaska)
- Aamus


Haddii carrar iyo dhuumasho aysan suurtogal ahayn:

- Is xassili
- Garaac 911, haddii ay suurtogal tahay, si aad boliiska ula socodsiisid meesha uu ku sugaran yahay toogtaha firfircoon
- Haddii aadan hadli karin, ha kuu furnaado leenka una ogolow in xariiriyaha (dispatcher) uu dhageysto

3. DAGAALAN

Tallada ugu dambeysyo, taasoo ah marka naftaada ku jирто halis degdeg ah, iskuday in aad carqaladeysid iyo/ama in aad itaal darreysid toogtaha firfircoon, adiga oo:

- Weerara isaga/iyada ilaa inta suurtogalka ah
- Ku tuura alaabta iyo waxyaabaha hubka laga dhigto
- Qeyliya
- Xoogga saara talaabada aad qaadir



SIDA LOOGA JAWAABO MARKA HIRGELINTA SHARCIGA TIMAADO

Ujeedada hirgelinta sharciga waa in la joojiyo toogtaha firfircoon sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah. Saraakiisha waxay si toos ah u abaari doonaan goobta laga maqlay xabbadii ugu dambeysay.

- Saraakiisha waxay badanaa u yimaadaan sida kooxo ka kooban afar (4)
- Waxaa dhici karto in saraakiisha qaataan labbiska kormeerka caadiga ama labbiska kor laga qato ee xabbadda celiyo, koofiyadaha Kevlar, iyo qalabka kale ee loo isticmaalo xiilad ahaan
- Waxaa dhici karto in saraakiisha ku hubeysan yahiin qoryo waaweyn, qoryaha yaryar, qoryaha gacanta
- Waxaa dhici karto in saraakiisha adeegsadaan buufinta basbaaska ama gaaska illinta si ay u kantaroolaan xaaladda
- Waxaa dhici karto in saraakiisha ku qeyliyaan ammaro, iyo in ay dadka ku riixaan dhulka si ay u sugaan ammaankooda

Sida loo dhaqmo marka hirgelinta sharciga timaado:

- Is xassili, adiga oo raaca tilmaamaha saraakiisha
- Hoos u dhig waxyaabaha aad gacanta ku haysid (sida boorsooyinka, jaakooyinka)
- Isla markiiba kor u taag gacmaha iyo fidi faraha
- Ha la arko gacmahaada mar kasta
- Iska ilaali in aad dhakhsa abartaad saraakiisha sida in aad iyaga qabsatid si aad u heshid ammaan
- Iska ilaali in aad farta ku fiiqdid, ooysid iyo/ama qeylisid
- Ha joogsanin in aad saraakiisha weydisatid kaalmo ama tilmaan marka aad carraleysid, u dhqaqaq dhanka saraakiisha ka soo gashay xerada

Macluumaadka loo baahan yahay in la siiyo hirgelinta sharciga ama hawl wadeenka 911:

- Meesha uu ku sugar yahay toogtaha firfircoon
- Tirada toogteyaasha, haddii ay ka badan yahiin hal
- Sifeynta jirka toogtaha (toogteyaasha)
- Tirada iyo nooca hubka uu haysto toogtaha (toogteyaasha)
- Tirada dhibbaneyaasha suurtogalka ah ee meesha ku sugar

Saraakiisha kowaad ee yimaada goobta ma istaagi doonaan si ay u kaalmeyaan dadka dhaawacan. Filo kooxaha badbaadinta oo ka kooban saraakiil dheeraad ah iyo shaqaalaha caafimaadka degdegga oo soo raaca saraakiisha hore. Kooxahaan badbaadinta waxay daweyn doonaan iyo waxay qaadi doonaan dadka dhaawacan. Waxay kaloo u yeeri karaan dadka, jir ahaan, awoodda u leh in ay kaalmo ka geystaan in dhaawaca laga qaado xerada.

Kaddib marka aad tagtid meel ammaan ah ama meel leysugu yimaado, waxay u badan tahay in hirgelinta sharciga ay meeshaas kugu sii hayaan ilaa ay ka kantaroolaan xaaladda, kaddibna la tilmaamo marqaatiyada lana weydiyo su'aalo. Ha tagin ilaa madaxda hirgelinta sharciga ku faraan in aad sidaas sameysid.

IN AAD SHAQAALAHAAADA U TABABARTID XAALADDA TOOGTAHA FIRFIRCOON

Si aad shaqaalahaada ugu diyaarisid xaaladda toogtaha firfircoo, samayso Qorshaha Falka Degdegga (*Emergency Action Plan*) (EAP), iyo fulli leyliyada tababarka. Wadajir ahaan, EAP iyo leyliyada tababarka waxay shaqaalahaada u diyaarin doonaan in ay si wanaagsan uga jawaabaan kana geystaan kaalmo sida loo yareeyo nafta la waayo.

Qeybaha Qorshaha Falka Degdegga (Emergency Action Plan) (EAP)

Soo saar EAP adiga oo fikrad ka qaata dhowr ka mid ah dhinacyada daneeya sida waaxda ilaha aadanaha, waaxdaada tababarka (haddii uu jiro mid), milkiileyaasha dhismaha / hawl wadeenada, maamulaha hantidaada, iyo hirgelinta sharciga deegaanka iyo/ama kuwa ka hawaabo degdegga. EAP_da habeysan waxaa ka mid ah:

- Hab la jecel yahay oo loo adeegsado ka-warbixinta dabka iyo degdegyada kale
- Siyaasadda ka bixidda iyo habka
- Hababka ka bixidda degdegga iyo magacaabidda jidadka (sida naqshadda dhulka, meelaha ammaanka ah)
- Macluumaadka lagala xariiro, iyo mas'uuliyadda saaran dadka loo baahan yahay in lala xariiro sida hoos timaado EAP
- Macluumaadka la xariira isbitaalada xaafadda deegaanka (sida magaca, nambarka telefoonka, iyo masaafada uu u jiro goobtaada)
- Siistemka ogeysiiska degdegga ee loogu talogalay in dhinacyada kala duwan lagu ogeysiyo degdegga:
 - Shakhxiyaadka ku sugar goobaha fog balse ku sugar gudaha xerada
 - Hirgelinta sharciga xaafadda
 - Isbitaalada xaafadda

Qeybaha Leyliyada Tababarka

Inta badan sida ugu habboon ee loo tababaro shaqaalahaada si ay uga jawaabaan xaaladda toogtaha firfircoo waxay tahay in la fulliyo leyliiga tababarka toogtaha firfircoo. Hirgelinta sharciga xaafadda waa ilo heer sare oo lagu handaso leyliyada tababarka.

- Aqoonsiga dhawaaqa xabbada ka dhacdo qoryaha
- In dhakhso laga jawaabo marka la maqlo xabbadaha iyo/ama marka la arko toogasho:
 - Orod
 - Dhuumo
 - La dagaalan toogtaha marka ay tahay tallada ugu dambeyso
- Wicidda 911
- Ka-hortagga marka hirgelinta sharciga timaado
- Qaadashada fikradda nolol doonka waqtiyada shiddada

Siyaabo Dheeraad ah oo leysugu Diyaariyo Loogana Hortago Xaaladda Toogtaha Firfircoon

• Is-Diyaarinta

- Hubso in dhismahaada leeyahay ugu yaraan labo jid oo lagu carraro
- Meelo la arki karo dhig jidadka lagu carraro dhismahaada oo idil
- Ku dar hirgelinta sharciga iyo kuwa jawaabta kowaad inta uu socdo leyliga tababarka
- Ku dhiirigeli hirgelinta sharciga, kuwa ka jawaabo xaaladaha degdeggaa, kooxaha SWAT, kooxaha K-9, iyo kooxaha bambka in ay xaafadaada ku qaataan tababar ku saabsan xaaladda toogtaha firfircoon.

• Ka Hortagga

- Fududee goob shaqo oo leysku ixtiraamo
- La soco tilmaamaha ku saabsan dagaalka goobta shaqada kaddibna talaabo ka qaad sida ku habboon

Si aad u heshid maclumaaad badan oo ku saabsan EAP, la xariir U.S. Department of Labor (Waaxda Shaqada Mareykanka), Occupational Health and Safety Administration (Maamulka Caafimaadka Shaqada iyo Ammaanka, www.osha.gov.



ISU DIYAARINTA IYO MAAMULIDDA XAALADDA TOOGTAVA FIRFIRCOON

Waaxda ilaha aadanaha iyo maamuleyaasha dhismaha waa in ay ka qeybgalaan qorsheynta xaaladda degdeggaa, sida xaaladda toogtava firfircoon. In la qorsheysto xaaladaha degdeggaa waxay kaalmo u tahay yareynta in lala kulmo shil sida ku sharaxan hababka hoos lagu sharaxay.

Mas'uuliyadda Saaran Ilaha Aadanaha

- In ay fulliso baaritaan ku habboon iyo hubinta noloshii hore shaqaalaha
- In ay soo saarto siistem loo adeegsado ka-warbixinta calaamadaha dabeeecadda dagaalka ee suurtogalka ah
- In shaqaalaha la siiyo adeegyada la-tallinta
- In ay soo saarto EAP oo laga helo siyaasadaha iyo hababka wax looga qabto xaaladda toogtava firfircoon, iyo sidoo kale qorsheynta falka kaddib

Mas'uuliyadda Saaran Maamulaha Dhismaha

- In uu kantaroolo meelaha laga galo (sida fureyaasha, koodadka lagu galo siistemka ammaanka)
- In uu waxyaabaha muhiimka ah u qeybiyo maamuleyaasha ku habboon / shaqaalaha, sida:
 - Naqshadaha dhulka
 - Fureyaasha
 - Liisaska shaqaalaha iyo nambarada telefoonka dhismaha
- La shaqeeyo waaxda ammaanka dhismaha si loo sugo ammaanka goobta
- Isu keeno qalabka muhiimka sida:
 - raadiyeysaasha
 - naqshadaha dhulka
 - diwaanka shaqaalaha, iyo nambarada sida degdeggaa loogala xariiro shaqaalaha
 - qalabka kaalmada kowaad
 - tooshyada
- In uu naqshadaha dhulka ee laga saari karo galka ku meeleyo meel u dhaw meelaha laga soo galo iyo laga baxo si ay u qaataan dadka ka jawaabo xaaladda degdeggaa
- In uu shido siistemka ogeysiiska degdeggaa marka lala kulmo xaaladda degdeg ah

Sida Maamuleyaasha Uga Jawaabaan Xaaladda Toogtaha Firfircoon

Waxay u badan tahay in shaqaalaha iyo macaamiisha raacaan hoggaaminta maamuleyaasha inta lagu dhix jiro xaaladda degdegga. Inta ay socoto xaaladda degdegga, maamuleyaasha waa in ay la socdaan EAP, iyo in ay diyaar u ahaadaan:

- In ay qaadaan talaabo degdeg ah
- In ay is xassilian
- In ay xeraan iyo in ay wax ku dadbaan albaabada
- In ay shaqaalaha iyo macaamiisha saaraan iyaga oo mariya jid horay loo qorsheyay oo lagu baxsado ilaa laga geeyo meel ammaan ah

In ay kaalmeyaan Dadka Qaba Baahida Gaarka iyo/ama Itaal Darrida

- In ay hubsadaan in EAPyada, tilmaanta carrarka iyo macluumaadka kale ee munaasabka ah lana xariir dadka qaba baahida gaarka ah iyo/ama itaal darrida
- In dhismahaada yahay meel ay geli karaan dadka itaalka darran, sida waafaqsan sharuudaha ADA.



IN AY AQOONSADAAN DAGAALKA GOOBTA SHAQADA EE SUURTOGALKA AH

Waxaa dhici karto in toogtaha firfircoon ee ku sugar meesha aad ka shaqeysid in uu yahay shaqaale iminka shaqeeya ama horay u shaqeyn jiray, ama qof yaqaan shaqaale iminka shaqeeya ama horay u shaqeyn jiray. Maamuleyaasha wax garadka ah iyo shaqaalaha la shaqeyo waxay dareemi karaan sifooyinka dabeecadda dagaalka shaqaalaha ee suurtogalka ah La socodsii Waaxda Ilaha Aadanaha (Human Resources Department) haddii aad aaminsan tahay in shaqaale ama qof la shaqeyo muujiyo dabeecad dagaal oo suurtogal ah.

Waxyabaha Tilmaama Dagaalka Suurtogalka ah uu ku kaco Shaqaalaha

Caadi ahaan, ma aha in shaqaalaha “hal mar isbaddalaan,” balse waxay muujiyaan dabeecad dagaal oo suurtogal ah ilaa muddo. Haddii dabeecadaha noocaan la aqoonsado, badanaa waa wax la maamuli karo lana daweyn karo. Sida suurtogalka ah dabeecadaha dagaalka uu geysto shaqaalaha waxaa ka mid noqon kara mid ama ka badan kuwa soo socda (liiska dabeecadahaan ma aha mid dhamaystiran, mana loogu talogelin sida hab lagu baaro sasaanka dagaalka):

- Istimmaalka qamrada badan iyo/ama mukhaadaraadka sharci darrada
- Maqnaashada badan aan la sharixi karin; cabasho laga qabo jirka lana tilmaami karin
- Hoos u dhac la arki karo oo ku yimaada dareenka muuqaalka iyo nadaafadda
- Niyad jabka / is-aruurinta
- Ka horimaasho iyo ka badbadin laga qabo isbaddalada siyaasadda iyo hababka
- Ku celcelinta jebinta siyaasadaha shirkadda
- Isbadbalal darran iyo badan oo lagu arko caatifadda
- Jawaabo ku saleysan caatifad aan dagganeyn lana arki karo
- Dillaaca xanaaqa ama carro lana daandaansanin
- Is dillid; faalo ku saabsan “in la toosiyo waxyabaha”
- Dabeecad laga tuhmi karo cabsi, (“qof kasta waa iga soo horjeedaa”)
- Hadal badan oo ku saabsan dhibaatooyinka guriga
- Dhibatooinka guriga oo soo gaara goobta shaqada; sida darran ee looga hadlo dhibaatooyinka maaliyadda
- Ka-hadalka dhacdooyinka dagaalka ee la soo dhaafay
- Laxawsi loo qabo dadka geysta dagaalka
- Faalo badan aan loo baahneyn oo ku saabsan hubka xabadaha, hubabka kale ee halista ah iyo dambiyada dagaalka

MAAMULIDDA WAXA KA DHASHA XAALADDA TOOGLAHA FIRFIRCOON

Kaddib marka la itaal darreeyo toogtaha firfircoon lana gaarsiiyo heer uusan halis ahayn, ilaha aadanaha iyo/ama maamulka waa in ay qeybgalaan qiimeynta iyo hawlaha dhacdada-kaddib, sida:

- Xisaabinta dhamaan dadka ku sugar meesha leysugu yimaado si loo ogaado, haddii uu jiro, qof maqan oo laga yaabo in uu dhaawac soo gaaray
- Helitaanka hab lagu ogeysiyo qoysaska iyo shakhsiyadka waxyeelada ka soo gaaray toogtaha firfircoon, sida ogeysiinta dhimasho kasta.
- Qiimeynta xaaladda madaxa dadka ku sugar goobta, kaddibna loo diro dadka ku takhasusa daryeelka caafimaadka
- In la aqoonsado lana buuxiyo booska shaqaalaha maqan ama waxyaabaha ka dhiman shaqada taasoo ka dhallatay toogtaha firfircoon

DARUUSTA LA QAATAY

Si loo fududeeyo qorsheynta degdegyada mustaqbalka, waxaa muhiim ah in daraasad lagu sameeyo xaaladda toogtaha firfircoon kaddibna la soo saaro warbixinta ka dambeysyo falka. Daraasadda iyo warbixinta ku jirto warbixintaan waxay waxtar u leedahay:

- In qoraal laga sameeyo hawlaha ka-jawaabidda
- In la aqoonsado guulaha iyo fashilaadda lagala kulmay dhacdada
- In daraasad lagu sameeyo waxqabadka EAP da iminka jirta
- In la sharaxo lana sifeeyo qorshaha lagu hagaajiyo EAP

Tixraacyada

Safety Guidelines for Armed Subjects, Active Shooter Situations, Indiana University Police Department, April 2007.

Safety Tips & Guidelines Regarding Potential “Active Shooter” Incidents Occurring on Campus, University of California Police.

Shots Fired, When Lightning Strikes (DVD), Center for Personal Protection and Safety, 2007.

Workplace Violence Desk Reference, Security Management Group International, www.SMGICorp.com

How to Plan for Workplace Emergencies and Evacuations, U.S. Department of Labor, Occupational Health and Safety Administration, OSHA 3088, 2001.



U.S. Department of Homeland Security

Washington, DC 20528

cfsteam@hq.dhs.gov

www.dhs.gov/active-shooter-preparedness

